

Imisa dabaq ayaa laga dhisayaa goobtii ay ku bur-bureen Daarihii Mataanaha ahaa ee (twin Towers)?

W/T: Yaxye Yuusuf Khasaaro
e-mail; yaxyekhasaaro@msn.com

Iyadoo weli Shacabka Reer Mareykan aysan niyaddooda ka go'in bur-burkii loo geystay Daarihii Mataanaha ee Xaruntii ganacsiga Adduunka, kuwaas oo astaan u ahaa magaallada weyn ee New York ee Twin Towers-ka, kuwaasoo qaraxooda loo adeegsaday Diyaarado ay ka buuxeen walxaha Qarxa 11-kii September 2001-dii, iyadoo maanta oo



Naqshadaha saddexda Dabaq ee cusub ee laga dhisayo halkii ay horey uga dhisnaayeen Daarihii Mataanaha ahaa

Isniin ahna loo dabaal degayo sanad guuradii 5-aad ee ka soo wareegatay goortii uu dhacay qaraxani aaya waxaa dorraad la soo bandhigay naqshadaha saddex dabaq oo la mid ah Daarihii Mataanaha ahaa oo laga dhisayo goobtii ay ku bur-bureen Daarihii dhaadheeraa ee

quruxda badnaa isla markaana Mataanaha ahaa.

Naqshadahan cusub ee saddexdan daarood ayaawaxaa soo bandhigay saddex Injineer oo lagu kala magacaabo Norman Foster oo u dhashay Mareykanka, Richard Rochers oo isna Reer London ah iyo Injineerka weyn ee Reer Japan Vomihako Maki, iyadoo saddexda naqshadood ee Daarahani ay soo bandhigeen Injineerradanina ay kala duwan yihiin.

Sidoo kale dhismaha daarahani ayaawaxaa uu hir galayaa bilaha soo socda ama sanadka nagu soo fool leh sida ay shaaciyeen wakaaladaha wararka dalka Mareykanka.

Sylvester Stein oo ka mid ah dadka maal gashiga ku leh Daarahani cusub ee la dhisayo ayaawusay in Sawirrada Dabaqyadani cusub la soo bandhigi doono marka la dhammeeyo dhismahooda 6-da sanadood ee soo socota, waxaana uu intaa ku daray in sidoo kale la baabi'inayo dhismeyaal gaagaaban oo ku hareereysan halkii uu horey u ahayd Xaruntii Ganacsiga Adduunka.

Waxay ahayd maalin Talaado ah, 11-kii September 2001-dii taasoo weli ku dambeysa xusuusta qof kasta oo Mareykan ah markii 19-Dhallinyaro oo ka tirsan Ururka Al-Qaacida oo ay ka mid ahaayeengrag

Duuliyeyaal ah ay Diyaarado noocyadoodu ahay (United Airlines Flight 175 iyo American Airlines Flight 11) dhix dhigeen labadii Daarood ee Xaruntii Ganacsiga Adduunka, iyadoo laba saacadood kaddibna gebi ahaanba ay dhulka la sinmeen Dabaqyadaasi, waxaana la xaqiijiyey in ay halkaasi ku naf waayeen 2,973-qofood, halka 24-qof oo kalena la waayay meel ay ku dambeeyeen.

Waxaa kale oo la sheegay in waxyaabaha fududeeyey qaraxyadaasi aadka u waaweyn ay ka mid ahaayeen Shidaalkii faraha badnaa ee saarnaa Diyaaradahaasi oo lagu qiyaasay midkiiba in ay saarnaayeen 24,000-US Gallons oo u dhiganta 91,000-liters, sidoo kale waxaa jiray laba Diyaaradood oo kale oo iyagana qayb ka ahaa Qaraxyadani, waxaana ka mid ahaa Diyaarad lagu qarxiyay Pentagon-ka iyadoo halkaasina ay ku dhinteen 125-qofood.


Waxyeelladu keliya kuma koobneyn Labada Daarood ee Mataanaha ahaa kuwaas oo midkiiba ka koobnaa 110-Dabaq, hase ahaatee waxaa burburay ama si xun u waxyeeloobay 5-dabaq oo kale oo ku xeernaa Twin Towers-ka, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen 7 World Trade Center, Marriott Hotel, New York City Subway stations, St. Nicholas Greek Orthodox Church.

Naftu orod bay kugu aamintaaye waxyaabihiil la yaabka lahaa waxaa ka mid ahaa in dad gaaraya 200-qof ay ka soo boodeen qolalka sare ee Daariihii Mataanaha ahaa oo waqtigaasi si ba'an u gubanayay qiiq fara badanna uu ka baxayay, iyadoo dadkaasi ka soo booday Daaraahaasina midkoodna uusan naf dhulka la soo gaarin.

Wakaaladda Wararka ee Associated Press oo ka hadleysay qarixii 11-kii September 2001 ayaa waxay soo bandhigtay 1,600 oo Hilbo go'goan ah oo la garan waayay dadkoodii iyo 10,000-Lafo ah oo aan ku jirin liiska dadkii la xaqiijiyey in ay geeriyoodeen kuwaasoo ka dhashay qaraxyadii waaweynaa. Magacyada raggi la xusay in ay ka dambeeyeen qaraxyadii 11-kii September 2001 waxaa ka mid ah Ramzi Binalshib oo Visa ku joogay Mareykanka, Mohamed Al Kahtani oo isna heystay Dhalashada Saudi Arabia, Zacarias Moussaoui oo isagu dhowaan Maxkamad lagu saaray gudaha Mareykanka, halkaasina lagu xukumay, Saeed Al-



Nin ka mid ah 200-boqol ee qof ee ka
soo booday Daariihii Mataanaha ahaa!



Ghamdi, Mushabib al-Hamlan, Zakariya Essabar, Ali Abdul Aziz Ali, Towfiq bin Attash, Khalid Sheikh Mohamed.

Mataaniihi Twin Towers waxaa naqshadoodii la soo bandhigay 1960-kii, waxaa dhismihiisa oo billowday 1966-kii ka qayb qaataay 10,000-Shaqaale, intii uu dhismuhu socday waxaa ku naf waayay 60-shaqaale, waxaa laga sameeyey 200,000-tone oo dhagaxda adag ah, waxay lahaayeen 43,600-Daaqadood, waxaa ku jirtay Koronto Fiilooyinkeedu gaarayay 12,000-Mile, waxaa kale oo Daarahaasi ay lahaayeen Zip code ama fure u gaar ah (10048), dabaq walbana waxa uu culeyskiisu gaarayay 500,000 ton, sidoo kale dabaq walba waxa uu lahaa 97 Wiish oo qolalka u daad gureysa rakaabka, waxaa ka shaqeynayay labada Dabaq illaa 50,000-shaqaale.



Sawirrada qaar ka mid ah boqollaalkii ku naf waayay weerarradii 11th September 2001

Geba-gebadiina qaraxyadii September 11th 2001 markii ay dhaceen kaddib ayaa waxaa cajalad Video ah soo gaarsiiyay Telefishinka Al-Jazeera ee afka Carabiga ku hadla hoggaamiyaha Ururka Al-Qaacida

Usama Bin Ladin oo halkaasi ku qirtay in uu ka dambeeyey weerarradii 11-kii September. Madaxweynaha dalka Mareykanka George W. Bush ayaa isna kaddib weerarradaasi ku dhawaqaqay in uu bilaabayn howlgal loogu magac daray la dagaallanka ama ka hortagga argagixisada (anti-terrorism), iyadoo kaddibna dalal badan oo ay ka mid yihiin **Ingiriiska, India, Australia, France, Germany, Indonesia, China, Canada, Russia, Jordan, Pakistan, Mauritius, Uganda, Zimbabwe, Italy, Malaysia, Indonesia iyo Philippine** ay Mareykanka ku taageereen ololaha la dagaallanka argagixisada, halka dalal kale oo badanna ay gadaal dambe kaga soo biireen ololahan.

W/T: Yaxye Yuusuf Khasaaro
e-mail; yaxyekhasaaro@msn.com

Afeef: Aragtida qoraalkan waxaa leh qoraaga ku saxiixan

Faafin: SomaliTalk.com | Sept 15, 2006